



Juun 18, 2018

Shaqaalaha Qaaliga ah ee Dugsiga Sare ee South, Qoysaska iyo Ardayda,

Waad kumahadsantihiin taageerada joogtada ah ee aad siisaan ardaydeena, macalimiinteena iyo hogaanka Dugsiga Sare ee South.

Waxaan si murug leh idiinla wadaagaynaa in Jennifer Hanson, oo ah maamulaha Dugsi Sare ee South, aysan dugsiga South kusoolaaban doonin sanad dugsiyeedka 2018-19 sabab laxariirta dhibaatooyinka dhanka caafimeedkeeda ah. Marwo. Hanson waxay hogaamiye cajiib ah u ahay bulshada Rebel. Intay hogaanka haysay, tirada ardayda aan cadaanka ahyn ee dhigta fasalada buundooyinka kuleejka lagu kordhiyo ayaa kor ukacday laga bilaabo 73 sanadkii 2016 ilaa 592 sanadka 2018 qiimaha kororka ee dugsiygada afarto ahna waa dugsiga labaad ee ugu sareeya magaalada oo kujira xawaare kobac oo dhan 67%. Sanadka 2018, dugsiga South ayaa lagu abaalmariyay hadiyada Dugsiga Fursadaha waxaana siisay Xarunta Siyaasada Waxbarashada Qaranka, waana abaal marin lasiiyay kaliya sideed dugsi wadankoo dhan laguna soodaabacay wargayska Washington Post. Waxaan doonaynaa inaan waqtiga uga faaiidaysano mahadnaqan qotoda dheer ee aan uhayno Maamulaheena Jennifer Hanson iyo dadaalkeeda ay galisay ardaydeena iyo shaqaalaha dugsiga South. Waan uxiisi doonaa Marwo Hanson waxaana urajaynaynaa caafimaad sareecan ah.

Waxaan kufaraxsanahay inaan kudhawaaqno in Mudane Bobby Thomas uu noqonaayo maamulaha kumeelgaarka ah ee Dugsi Sare ee South sanad dugsiyeedka 2018-19. Mudane Thomas wuxuu maamule ka ahaa Machadka Summit lixdii sano ee lasoo dhaafay, asagoo kasoo qaaday dugsi kujira khadka cas gaarsiiyayna heerka khadka cagaaran. Dhamaan sanadkasta oo uu kashaqaynaayay Summit, wuxuu si joogto ah uhaystay wax kabadan 95% sahankeedii qanaacada ee laga aruurshay ardayda iyo waalidiinta. Kahor intuuusan noqon hogaamiyaha dugsiga, wuxuu kasoo shaqeeyay caawimaada ardayda baahiyaha gaarka ah qaba, wuxuuna ahaa macalin oonleenka wax kudhiga oo lajecelyahay, wuxuu ahaa madaxa Gudigga Ardayda, Madaxa Ururka Bulshooyinka kaladuwan, Macalinka Waxbarashada Darawalaynta iyo tababaraha kubada cagta. Dugsi Sare ee South wuxuu asaga uyahay meel gaar ah sabab inuu kasoo jeedo qoys qoomiyado kaladuwan udhashay iyo sidoo kale xaaskiisa, sodohdiis iyo sodogis ayaa kamid ah gudigga Rebel. Wuxuu caan kuyahay xariirka uu laleeyahay ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha, sida uu ugu dadaalo dhamaan ardayda, iyo hogaankiisa dhaqanka iskuulka ee kudayashada mudan. Dugsi Sare ee South waxaa gacanta kuhaynaa shaqsi karti leh!

Denver Public Schools ayaa kalashaqaynaaya Gudigga Wadashaqaynta Dugsiga ee South sanad dugsiyeedka soosocda si ay ugala shaqeeyaan nidaamka doorashada maamule rasmi ah marka lagaaro sanad dugsiyeedka 2019-20. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan nidaamka doorashada iyo sida aad uga qaybqaadan karotaba, waxaa laguusoo dirayaa dhamaadka xiliga dayrta.

Marwo. Hanson iyo Mudane. Thomas ayaa udaagan inay kawada shaqeeyaan xilwareejin daganaan leh una sameeyaan shaqaalaha iyo ardaydeena reer South. Waxaan siidaynaa inaan kalashaqayno shaqaalaha, ardayda iyo qoysaska, waxaana si guud idiinka mahadcelinaynaa taageeradiina joogtada ah. Hadaad qabto wax suaal ah, fadlan haka daahin inaad wacdo laynka Caawimaada Qoyska iyo Bishada oo ah 720-423-3054. Mahadsanid!

Mahadsanid,

Suzanne Morris-Sherer
Maamulaha Casharada
Ururka Dusiga Sare

Amber Elias
Maamulaha Shaqooyinka
Ururka Dusiga Sare